


"Haye fiiri!" Möllö Pöötinen ayaa saaxiibkiis Hiiru u qeylinaaya markuu hawada ku sameeyo ugu yaraan shan qalaamo rogad. Hiiruna si farxad leh ayuu uga sacaba tumaa, markuu Möllö u soo dego dhulka ee xaga geedka jiridiisa.

"Goormaad baratay saddexda qaalmarogaadka ee sare?" Hiiru ayaa si xamaasad leh u weyddiiyey.

"Hmmm ... waxaa laga yaabaa laba maalmood ka hor," Möllö ayaa si aan la hubin ugu jawaabay.



Möllö wuxuu u duulaayaa hawada oo wareegaysanayaa ilaa uu madaxu wareero.

Mar kale ayuu dhulka ku soo noqonayaa.

Isla markiiba qaylo ayaa Möllö hoostiisa ka soo yeeraysa.

Möllö kor ayuu u boodaa isagoo baqdini ka muuqato filranaayana meeshii uu fadhiyay.

"WARYAA ! TAXADAR MUUJI ! ayuu codku ku qaylinaa.

Waxba ma muuqdaan.

Möllö mar kale ayuu dhulka u soo degaa oo meesha baaraa.

Codkii aya mar kale la maqlaa.

"HALKAN UMA IMAAN IN DHULKA LAYGU SIMO, LAAKIIN WAXAAN U IMI IN LAY CAAWINO!"



Möllö wuxuu si aad ah u eegay dhulka, wuxuuna arkay quraanyo ay yara wax gaareen. " haye, Murkku! Ma aanan ogeyn inaad adiga tahay. " "Sidee tahay?" Möllö ayaa ku farxay. Muddo dheer ma uusan arag saaxiibkiisii wanaagsanaa ee Murkku. "WAA FIICNAA ILAA INTAADAN IGU FARIISAN OO DHULKA ILA SIMIN ayuu Murkku ku qaylinaa isgoo xanaaqsan. Möllö wuxuu fiirinaa Hiiru isagoo yara fajacsan. ka dibna wuxuu ku jawaabaa, "Waan ka xumahay inaan kugu fariisto. Ula kac uma samayn. Laakiin maxaad u timid?"



Murkku wuxuu koraa geedka
jiridiisa isagoo fiirinaaya Möllö.
“Quraanyada godkeeda waxaa ka
jira xaalad degdeg ah! Waa la
burburiyey.
Qof ayaa dul maray.
Waxaan filaayaa inaad
caawineysaan?
ayuu Murkku ku qaylinaa isagoo
walaacsan.



**Möllö markan waa garwaaqsaday in gurmادku run yahay.
"Dabcan waan caawineynaa!" ayuu Hiiru oo ku soo biiray
wada hadalka ku qaylinaa.**



"waa sidaa!"


**Möllö ayaa ku raacaya isagoo ku faraxsan fikraddaas.
Dabcan wuu rabaa inuu caawiyo saaxiibbadiis.**




**Möllö intuu dhabarka
ku qaato Hiiru iyo
Murku ayuu hawada u
duulaa..**

**Dabaysha ayaa dhegahooda ka
yeereysa markay Möllö iyo
saaxiibbadiis dul maraayeen dhulkii
iyo keymahii ay yaqaanen.**

"Waa sidaa!" Möllö neefaa ka boodeysa markuu ku soo dego godka quraanyada agtiisa. Murkku iyo Hiiruba way ka soo boodayaan Möllö dhabarkiisa waxayna bilaabayaan inay baaraan buulka quraanyada oo lagu dhulka la simay. buulka ayaa laga maqlaa jabaq markay quraanyadu midba markiisa u ka soo hor muuqado saaxiibadiis.



**“Waad ku mahadsan tihiin imaatinkiina !
Quraanyada godka oo dhami way idiin mahad celinaayaan,
”ayuu kii ugu weynaa uguna horeeyey quraanyada yiri,
markay naftii ku soo noqotay.
Isla quraanyadii weyneyd waxay bilaabeysaa inay barto Hiiru
iyo Möllö sida saxa ah ee ay u caawini lahaayeen.**





Hiiru iyo Möllö waxay bilaabaayaan inay soo qaadaan oo meel isugu geeyaan qoryahii iyo laamahii ay quraanyadu u soo dhiibayeen. waqti yar ka dibna, buulkii ayaa si fiican oo weyn u dhismaya. Möllö iyo Hiiru neef tuur ayaa ka soo haray, laakiin way ku faraxsanaayeen shaqaday qabteen.



"Mahadsanidiin!"

quraanyada oo dhan ayaa ugu mahad celisey iyagoo qanacsan oo faraxsan.

Möllö intuu macasalaameeyo quraanyadii, ayuu dhabarka intuu ku qaato Hiiru hawada u duulaa.



**Möllö wuxuu marka hore u duula guriga Hiiru
ka dibna wuxuu sii aadaa buulkiisa.**

**Ugu dameyn ka hor intuusan seexan,
Möllö wuxuu ka fekerayaa inay fiican tahay ayna
muhiim tahay in la caawino saxiibada.**



